

# Minnesota Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow ee Minnesota)

## Derechos y responsabilidades del cliente

Minnesota Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow ee Minnesota) wuxuu ka ilaaliyaa macaamiisha deggan ee ay ku adag tahay bixinta biilkooda gaaska in adeegga gaaska laga jarto laga bilaabo Oktoobar 1 illaa Abril Haddii aad hesho ogeysiis in adeega lagaa goyn doono, waa inaad isla markiiba wax ka qabataa.

Akhri buug-yarahan si aad wax uga ogaato:

- Tallaabooyinka ay tahay inaad qaaddo si aad uga hortagto in lagaa gooyo adeegga gaaska
- Tallaabooyinka ay tahay inaad qaaddo si adeegga gaaska dib laguugu soo daayo
- Ku saabsan xuquuqdaada rafcaan ka qaadashada
- Xulasgooyinkaaga ogaysiiska qofka saddexaad

## Foomka codsiga ogeysiiska qofka saddexaad

Buuxi foomkan, qaybta hoose kajar oo u soo dir CenterPoint Energy, P.O. Box 59038, Minneapolis, MN 55459-0038, as soon as possible. Haddii ay dhacdo in Ogeysiiska Adeeg Goyn La soo jeediyay loo diro akoonka hoos ku qoran, CenterPoint sidoo kale waxay nuqlu u diri doontaa qofka saddexaad ee lagu qoray cinwaankooda hoos. CentrePoint ma qaadayso wax mas'uuliyad ah ku guuldaraysiga qofka saddexaad inay helaan ama ku dhaqmaan markay ogeysiiska helaan.

---

Magaca macmiilka (fadlan daabac)

---

Cinwaan

---

Magaalo/ Gobol / ZIP

---

Lambar taleefan

---

Lamnbarka akoonka biilkala laga helay

*Waan oggolahay in CenterPoint Energy laga yaabo inay macluumaad siiso, oo ay aqbalaan macluumaadka laga helay, qofka hoos lagu xusay.*

---

Macmiil saxiix / Taariikh

---

Magaca qofka saddexaadee ay tahay in la ogaysiyo / Ciwaan

---

Magaalo

---

Gobol / ZIP

---

Lambar taleefan

---

Saxiixa qofka saddexaad\* / Taariikh

## Xulashada ogeysiiska qofka saddexaad

CenterPoint Energy waxay dhammaan macaamiisha siisaa fursad ay ku helaan ogeysiis dhinac saddexaad ah haddii adeegooda gaaska la xirayo. Qolada saddexaad waxay noqon kartaa saaxiib, qaraabo, kaniisad ama hay'ad bulshada ah. Barnaamijkani wuxuu caawiyaa kuwa keligood nool, dadka waayeelka ah, kuwa naafada

**Sida ay u shaqayso.** Qolada saddexaad waxay heshaa nuqlada dhammaan ogeysiisyada adeeg joojinta ee boostada loogu soo diro macmiilka, laakiin LAGAMA rabo inay bixiyaan biilasha.

Si tabarucaad ah, qofka saddexaad ayaa awood u leh inuu helo oo bixiyo macluumaad ku saabsan duruufaha shaqsiedyed oo uu macaamilka CenterPoint Energy siyo qorshe lacag bixin ah. Tani waxay kaa caawin kartaa in laga fogaado joojinta adeegga.

## Sida loo codsado ogeysiiska qofka saddexaad

Haddii aad rabto inaad xusto qof saddexaad, fadlan buuxi foomka ogeysiiska qofka saddexaad ee dhanka bidix kuna soo celi CenterPoint. Haddii aad taqaan qof isticmaali kara kaalmada qof saddexaad, fadlan sii foomkan.


## Macluumaad kale oo muhiim ah

Haddii joojinta adeegga ay saameynayso qalabka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah, fadlan la xiriir

## CenterPoint Energy

612-372-4680 ama 800-729-6164  
(khadka lacag la'aanta ah).

TDD/TTY hearing-impaired service  
7-1-1 to have the TDD operator  
service place a collect call to  
CenterPoint Energy.



**Si taxaddar leh u akhri buug-yarahsan si aad u hubiso inaad fahantay xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ee hoos imaanaya Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow). Haddii aad qabtid wax su'aalo ama aad doonaysid macluumaaad dheeraad ah, kala xiriir CenterPoint Energy taleefanka 612-372-4680 ama 800-729-6164 (khadka lacad la'aanta ah).**

### **Ku saabsan Minnesota Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow ee Minnesota)**

Sharciga Xeerka Cimilada Qabow ee Gobolka Minnesota wuxuu caawiya macaamiisha aad si buuxda u bixin karin biilkooda gaaska. Waxaa laga yaabaa inaysan si buuxda u joojinay adeeg goynta jilaalka laakiin waxay siisa macaamiisha ilaalin dheeraad ah laga bilaabo Oktoobar 1 illaa Abril 30. Xeerkku wuxuu qeexayaa:

- Waxa aad samayn karto haddii aad hesho Ogeysiiska Adeeg Goyn La soo jeediyay
- Waxa aad samayn karto haddii adeega lagaa jaray oo aad doonayso in dib laguugu soo daayo adeegga gaaska

Haddii aad hesho Ogeysiiska Adeeg Goyn La soo jeediyay, CenterPoint Energy sidoo kale waxay kuu soo diri doontaa agabyada soo socda si ay kaaga caawiso maareynta biilka gaaskaaga:

1. Macluumaaadka ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga
2. Macluumaaad ku saabsan sida loo yareeyo isticmaalka tamarta
3. Liis ay ku qoran yihiin wakaaladaha dadka ka caawiya bixinta biilasha gaaska
4. Liis ay ku qoran yihiin bixiyeyaasha difaaca cimilada

### **Waxa la samaynayo haddii aad hesho Ogeysiiska Adeeg Goyn La soo jeediyay ama haddii adeeggaaga lagaa jaray**

Si aad uga fogato adeeg in lagaa jaro ama in adeegga dib laguugu soo daayo, waa inaad u bixisaa biilkaga si buuxda ama aad wacdaa

CentrePoint isla markaana aad gasho Qorshaha Lacag bixinta. Waa inaad dhawrtaa Qorshaha Lacag bixinta inta lagu jiro bilaha Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow) si aad u sii wado helitaanka gaashaanka in lagaa jarto adeega.

**Qorshaha Lacag bixinta.** Waaad xaq u leedahay inaad samayso Qorshe Lacag bixin inta lagu jiro bilaha Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow). Si aad u samaysato Qorshaha

Lacag bixinta, ka wac CentrePoint lambarka ku qoran gadaasha buug-yarahsan — looma baahna codsi qoraal ah. Haddii adiga iyo CenterPoint Energy isku raacdaan Qorshe Lacag bixin, oo aad sii waddo bixinta lacagahaaga, adeegga gaaska dabiiciga ah lama jari doono.

Qorshaha Lacag bixinta waa inuu tixgeliyaa duruufahaaga maaliyadeed, iyo duruufo kasta oo kale, waana inuu ahaado mid adiga iyo CenterPoint Energy aad aqbali kartaan. Waxay dabooli doontaa wixii lagugu lahaa iyadoo lagu darayo qaddarka lagugu soo dallaci doono muddada Qorshaha Lacag bixinta lagu jiro. Inta badan qorshayaasha lacag bixinta ee hoos yimaada Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow) waxay soconayaan ilaa Abril 30 haddii aadan ku heshiin xilli kale. Haddii adiga iyo CenterPoint aydaan awoodin inaad isku raacdaan Qorshaha Lacag bixinta, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ugudbiso Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota si laguu caawiyo.

CenterPoint Energy sidoo kale waxay kuu gudbin kartaa wakaalado laga yaabo inay kaa caawiyaan bixinta biilasha tamartaada.

Haddii aad hesho Kaalmada Tamarta, si otomaatig ah ayaad xaq ugu leedahay gaashaanka waafaqsan Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow). Tani waxay kaa dhigi doontaa inaad u qalanto shuruudaha lacag bixinta gaarka ah. Shuruudahan, CenterPoint Energy uma baahna inaad ku bixiso wax ka badan 10% dakhliga qoyskaaga bil kasta biilk gaaska dabiiciga ah Haddii aad la kulanto tilmaamaha dakhliga dhexe ee gobolka laakiin aadan helin Kaalmada Tamarta, shuruuddan lacag bixinta gaarka ah ayaa sidoo kale laguu heli karaa markaad bixiso caddayn dakhli.

Haddii aad ogaato inaad awoodin inaad bixiso lacagaha sida lagu heshiiyay, wac CentrePoint Energy si aad u codsato in beddel la sameeyo. Haddii adiga iyo CenterPoint aydaan awoodin inaad isku raacdaan Qorshaha Lacag bixinta, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato.

### **¿Cómo solicito las protecciones de la Regla de Clima Frío? Sideen u codsadaa ilaalada Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow)?**

La xiriir CentrePoint Energy si aad u samaysato qorshaha lacag bixinta Cold Weather Rule (Xeerka Cimilada Qabow).

#### **Maxaa dhacaya markaan codsado kadib?**

Si acuerdas y cumples un plan de pagos según lo establecido en la Regla de Clima Frío, estarás protegido contra desconexiones; en caso de que te hayan desconectado el servicio, lo reconectarán.

#### **Xaqa u lahaanshaha racfaanka**

Haddii adiga iyo CenterPoint Energy aad ku heshiin weydaan Qorshe Lacag bixin, beddelka la codsaday ee Qorshahaaga Lacag bixinta, ama heerka dakhligaaga, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. CenterPoint Energy waxay kuu soo diri doontaa ogeysiiska ku saabsan xaqa aad u leedahay inaad racfaan ka qaadatid. Foomka racfaanka waa inuu ku helaa Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota (MPUC) muddo dhan 10 maalmood gudahood kadib markii taariikhda boosto ahaan laguugu soo diro.

MPUC ayaa dib u eegis ku samayn doonto racfaankaaga. Inta lagu jiro waqtigan CenterPoint Energy ma jari doonto adeeggaaga ama dib ayay kuugu soo deyn doontaa adeeggaaga haddii horey lagaa jaray. MPUC waxay haysataa 20 maalmood oo shaqo si ay go'aan uga gaarto Qorshahaaga Lacag bixinta ka dib markii ay helaan foomka racfaanka. Kala xiriir MPUC lambarka 651-296-0406, 800-657-3782 ama **consumer.puc@state.mn.us, mn.gov/puc**.